

Su´aalo ku saabsan xoog adeegsi (gacan ka hadal)

FOV vuxna
somaliska

Xoog adeegsiga ka dhex dhaca dadka xiriirka dhow leh wuxuu saamayn ku yeelanayaa caafimaadkaaga jireed iyo nafsiyadeed, sidaas darteed baan kuu waydiinaynaa. Waxay sidoo kale saamayn ku yaalanayaa carruurtaada caafimaadkooda jireed iyo nafsiyadeed. Carruurta waxay xaq u leeyihiin inay ku koraan xoog adeegsi la´aan. Xoog adeegsi wuxuu noqon karaa in adiga xoog lagu adeegsado ama aad aragtid qof kale oo loo gaysanayo. Waxaad sidoo kale heli kartaa taageero haddii ay cid xoog kuu adeegsatay ama aad aragtay ama maqashay iyadoo xoog loo adeegsanayo qof aad isku dhowdhiin markii aad soo koraysay. Waxaad sidoo kale adigu shaqsiyan heli kartaa caawinaad haddii aad adigu qof kale xoog u adeegsatay.

Qof aad isku dhowdhiin waxaan ka wadnaa saaxiib xiriir idinka dhexeeyo, qof qoyska ka tirsan, qaraabo ama qof kale oo muhiim ah.

1. Ma lagu soo hanjabay, lagu kontoroolayay, lagu bahdilay, lagu faduuliyay ama wax la mid ah oo uu kuu gaystay qof aad isku dhowdhiin?

- Haa
 Maya

2. Ma lagu qabqabtay, lagu kala tuuray, lagu garaacay, lagu laaday ama dhaawac si un kugu gaystay qof aad isku dhowdhiin?

- Haa
 Maya

3. Ma dareentay cadaadis ama lagugu khasbay ficillo galmo ah oo uu kuu gaystay qof aad isku dhowdhiin?

- Haa
 Maya

4. Xoog ma kuu adeegsaday qof aynaan isku dhawayn, sida ku cad su´aalaha 1-3?

- Haa
 Maya

5. Markii aad soo koraysay ma aragtay ama ma maqashay qof aad isku dhowdhiin oo loo adeegsanayo xoog sida ku cad su´aalaha 1-3?

- Haa
 Maya

6. Adigu shaqsiyan qof wayn ahaan qof kale xoog ma u adeegsatay sida ku cad su´aalaha 1-3?

- Haa
 Maya

7. Ma loo adeegsaday xoog (gacan ka hadal) carruur kula deggan ama kula degganayd sida ku cad su´aalaha 1-3?

- Haa
 Maya

Haddii ay jiraan wax aad ka fikiraysid ama aad rabtid inaad soo hadal qaadid,
ku qor bogga danbe!

Waad ku mahadsan inaad ka jawaabtay su´aalaha!